**SHARCI LR. 21**
**ANSIXINTA WAX KA BEDELKA SHARCIGA FURDOOYINKA**

**Taariikh: 05/02/2020**

## MADAXWEYNAHA J.F.S

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurks KMG

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka Lr.GSH252/12/01/B-10/20 taariikh 16/01/2020 kuna saabsan ansixinta Sharciga Wax ka bedelka Furdooyinka

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:**

### Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Wax ka bedelka Sharciga Furdooyinka.

### Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

**MUQDISHO: 05/02/2020**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/0449/2020
TAARIIKH 24/03/2020
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

Madaxweynaha J. F.S
**Maxamed Cabdullaahi Maxamed "Farmaajo"**

Ref: GSH/252/12/01/B-10/20 :الرقم

Mogadishu- Jan 16, 2020: التاريخ

Ku: Madaxweyanaha Jamhuuriyadda Federaalka soomaaliya
Muqdishu

---

Og: Guddoomiyaha Aqalka Sare
Muqdishu

---

Og: Ra'iisul wasaaraha Xukuumadda Federaalka
Muqdishu

---

Og: Guddiga Miisaaniyadda iyo L/X Hay'adaha Dawladda ee Golaha Shacabka
Muqdishu

---

Og: Garyqaanka Guud ee Dawladda
Muqdishu

---

Og: Hantidhawrka Qaranka
Muqdishu

---

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
Muqdishu

---

Og: Agaasimaha Waaxda Shuruucda ee Golaha Shacabka
Muqdishu

---

Ujeedo: Wax ka Bedelka Sharciga Furdooyinka

Mudane Madaxweyne,

Sida aad la socoto, **Wax ka Bedelka Sharciga Furdooyinka** ee halkaan ku lifaaqan waxa soo gudbiyey Xafiiska R/Wasaaraha XFS.

Kadib waxaa ka baaraandagey oo habraacii loogu talagaly **Guddiga Miisaaniyadda iyo L/X Hay'adaha Dawladda ee Golaha Shacabka**; iyadoo xildhibaanada Golaha Shacabka ay ka doodeen. Ugu danbayna wuxuu Goluhu ku aqbalay wax ka bedelkii Aqalka Sare ku soo sameeyey Sharcigan Kalfadhiga 6-aad Kulankiisii 31-aad taariikhdu markay ahayd 15/01/2020 iyadoo 143 Xildhibaan xaadir yihiin, codayntuna sidaan ayay u dhacaday:

**Oggol: 141;** **Diiday: 1;** **Ka aamustay: 1;**

Aqalka Sare ee Baarlamaanka Fadaraalka Soomaaliya, waxuu Golaha Shacabka u soo gudbiyey Sharcigan oo Ansax ah, oo wax ka badel lagu sameeyey nuqulkii Golaha Shacabku horey ugu direy Aqalka sare. Waxuu Aqalka Sare ugu soo gudbiyey Golaha Shacabka warqadda tirsigeedu yahay Ref/54 kuna taariikhaysan 12/12/2019.

Hadaba M.ne Madaxweyne waxaan si waafaqsan qodobka 90aad xarafka (f) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka, kaaga codsanayaa inaad go'aanka Golaha ku ogolaato Xeer Madaxweyne, si loogu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawlada.

**Naga Guddooma Salaan Qiimo iyo Qadarin Xanbaarsan**

**M.ne Maxmaed Mursal Sheikh Abdirahmaan**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS**

**Tell: +252 6 1 2224442 / +252-615577472**
**E-mail.** speaker@parliament.gov.so mmursal44@hotmail.com

# WAX KA BADELKA SHARCIGA FURDOOYINKA

| Guddoomiyaha Golaha Shacabka- Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| Tirada Xubnaha Codeysay 143 : Oggol: 141; Diiday: 1; Ka aamustay: 1; | |
| Saxiix: M.ne Maxamed Mursal Sheikh Cabdirahman | Taariikh: Jan 16, 2020 |

| Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| Saxiix: M.ne Abdiweli Sh. Ibrahim Muudey | Taariikh: Jan 16, 2020 |

| Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| Saxiixa: Mudane Cabdikarim Xaaji Cabdi Buux | Taariikh: Jan 16, 2020 |

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Aqalka Sare
Xafiiska Guddoomiye KX 1aad

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشيوخ
مكتب النائب الأول

Federal Republic Of Somalia
The Upper House
Office Of The 1st Deputy Speaker

Ref: 54/___ رقم

Taariikh-Date: 12/12/2019 تاريخ

Ku:- Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS =Muqdisho=
Og:- Xafiiska Gatyaqaanka Guud ee Dowladda =Muqdisho=
Og:- Guddiga Maaliyadda ee Aqalka Sare =Muqdisho=
Og:- Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=
Og:- Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

**Ujeeddo:**

**Soo Gudbin Qaraar Gole (Ansixinta Sharciga Canshuuraha Furdooyinka)**

Mudane Guddoomiye,

Salaan diirran ka dib, waxaan kuu soo gudbinayaa Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee tirsigiisu yahay Tix: **GAS/B-10/KF6/08/2019** kuna taariikheysan **04 Dec. 2019** kuna ansixiyay Goluhu Sharciga Sharciga Canshuuraha Furdooyinka:

- Waxaa codeeyay: **32 Senatar.**
- Waxaa oggolaaday: **32 Senatar.**
- Waxaa diiday: **0 Senatar.**
- Waxaa ka aamusay: **0 Senatar.**

Sidaas darteed, Mudane Guddoomiye, waxaa halkan ku lifaaqan Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee kor ku xusan iyo nuqulka sharciga uu Goluhu soo ansixiyay si aad u gudataan waajibka dastuuriga ee la idin igmaday.

Iga guddoon qadarin.

**Sen. Abshir Maxamed Axmed**
**Ku-Xigeenka 1aad Ahna Ku Simaha Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

# ANSIXINTA SHARCIGA CANSHUURAHA FURDOOYINKA

| Senatarada Codeeyay | Oggolaaday | Diiday | Ka Aamusay |
|---|---|---|---|
| 32 | 32 | 0 | 0 |

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi

Taariikh: 04th Disembar 2019

Guddoomiye Ku Xigeenka Kowaad ee Golaha Aqalka Sare
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

Sen. Abshir Maxamed Axmed

Taariikh: 04th Disembar 2019

Guddoomiye Ku Xigeenka Labaad ee Golaha Aqalka Sare
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

Sen. Mowliid Xuseen Guhaad

Taariikh: 04th Disembar 2019

KMU, Degmada Shibis, Benaadir- Muqdisho- Soomaaliya
Landline: +252 6143620 · Mobile: +252 615519950
Email: Speaker@Senate.gov.so - Fde[illegible]@gmail.com
www.senate.gov.so

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## GOLAHA AQALKA SARE
## BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# QARAAR GOLE
# ANSIXINTA SHARCIGA
# CANSHUURAHA FURDOOYINKA

Muqdisho,

04 Disembar 2019

Tix: GAS/B-10/KF6/08/2019 Taariikh: 04 Dec. 2019

Kalfadhiga 6aad

Kulankiisa 21aad

## GOLAHA AQALKA SARE EE BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**MARKUU AKHRIYAY:**

Sharciga Canshuuraha Furdooyinka oo ay nuqulkiisii kowaad soo corissay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya uuna soo ansixiyay Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya una soo gudbiyay Golaha Aqalka Sare **04 Nofembar 2019**; si uu uga guto waajibka dastuuriga ah ee loo igmaday.

**MARKUU ARKAY:**

**Qod.82aad** iyo **Qod.83aad** ee Dastuurka KMG ah iyo **Qod.49aad** iyo **Qod.50aad** ee Xeer Hoosaadka Golaha Aqalka Sare.

**MARKUU ARKAY:**

**Qod.61aad (1) (3)** ee Dastuurka Ku Meel Gaar-ka ah.

**MARKUU TIXGELIYAY:**

Soo jeedinta in Sharciga Canshuuraha Furdooyinka loo ansixiyo sida uu u soo diyaariyay Guddiga Maaliyadda ee Aqalka Sare.

**MARKUU GAROWSADAY:**

In danta guud ee Dalku ku jirto in la meel mariyo Sharciga Canshuuraha Furdooyinka.

**ISAGA OO KU KULANSAN:**

Kalfadhiisa **6aad**, kulankiisa **21aad**, oo ay soo xaadireen **33 Senatar** (Soddon iyo Seddex Senatar).

## WUXUU GUDDOONSADAY QODOBADA HOOS KU XUSAN:

**Qod.1aad**

Golaha Aqalka Sare wuxuu cod wada-oggol ah ku ansixiyay **Sharciga Canshuuraha Furdooyinka** isaga oo wax-ka-beddel ku sameeyay.

**Qod.2aad**

Qaraarka Golaha Aqalka Sare waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya; si uu uga guto waajibka dastuuriga ah ee loo igmaday.

**Sen. Abashir Maxamed Axmed**
**Ku-Xigeenka 1aad ahna Kusimaha Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka
Xafiiska Guddoomiyaha

الجمهورية الفيدرالية الصومالية
مجلس الشعب
مكتب الرئيس

Somali Federal Republic
The House of the People
Office of the Speaker

Ref: 438/B-10/19:الرقم

Mogadishu, Date: November 4, 2019:التاريخ

**Ku:** Guddoomiyaha Aqalka Sare

**Og:** Madaxweyanaha JFS

**Og:** Ra'iisul Wasaaraha XFS

**Og:** Guddiga Miisaaniyadda, Maaliyadda, Qorshaynta iyo La-Xisaabtanka Hay'adaha Dowladda

**Og:** Garyqaanka Guud ee Dawladda

**Og:** Hantidhawrka Qaranka

**Og:** Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka

**Og:** Agaasimaha Waaxda Shuruucda ee Golaha Shacabka

**Ujeedo: Soo Gudbin Wax ka badalka Sharciga Furdooyinka**

**Mudane Guddoomiye, Mudanayaal,**

Sida aad la socotaan, **Wax ka badalka Sharciga Furdooyinka** ee halkaan ku lifaaqan waxaa soo gudbisay Wasaaradda Maaliyadda ee XFS, Kadib waxaa ka baaraandagay oo habraacii loogu talogalay marsiiyay Guddiga Maaliyadda ee Golaha Shacabka ayadoo xildhibaanada ay kaga doodeen akhrinta 2aad. Ugu danbayna wuxuu Goluhu ku ansixiyay wax ka badalka Sharciga Kalfadhiga 6-aad fadhigiisa 6-aad taariikhdu markay ahayd 30/10/2019, codayntuna sidaan ayay u dhacday:

**Kooramka: 142** **Oggol: 134** **Diiday: 5** **Ka aamustay: 3**

Mudane Guddoomiye waxaa halkaan ku lifaaqan nuqulka Wax ka badalka Sharciga uu Golaha Shacabku ansixiyay, iyo dukumentiyo sharaxaya heerarkii kala duwanaa ee uu soo maray, wax ka badalladii lagu sameeyay Sharcigaan, si aad oga gudataan waajibaadka Dastuuriga ah.

**M.ne Maxamed Mursal Sheikh Cabdiraxmaan**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJF**

Golaha Aqalka Sare
The Upper House
04 NOV 2019
SOO GELID / RECEIVED

Tell: +252 6 1 2224442 / +252-615577472
E-mail. speaker@parliament.gov.so mmursal44@hotmail.com

# Ansixinta Wax ka badalka Sharciga Furdooyinka

| Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee Baarlamaanka JFS | | | |
|---|---|---|---|
| Kooramka: 142 | Oggol: 134 | Diiday: 5 | Ka aamustay: 3 |
| Saxiix: M.ne Maxamed Mursal Sh. Cabdiraxmaan | | | Tr: November 4, 2019 |

| Guddoomiye ku-xigeenka 1-aad- Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| Saxiix: M.ne Cabdiweli Ibraahim Sh. Muudey | Tr: November 4, 2019 |

| Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka ee BJFS | |
|---|---|
| Saxiixa: M.ne Cabdikariim Xaaji Cabdi Buux | Tr: November 4, 2019 |

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# SHARCIGA
# CANSHUURAHA FURDOOYINKA

**Sharci Lr. ________ ee _______________________**
**SHARCIGA CANSHUURAHA FURDOOYINKA**

## QEYBTA 1^AAD
## MAAMULKA FURDOOYINKA

### Qodobka 1^aad
### Qeexid

1. "**Shuruucda Furdada":** waxaa ka mid ah sharcigan iyo sharci kasta oo kale oo la soo saaro oo la xiriira furdooyinka iyo bayaan kasta, xeer, xeer-nidaamiye ama qaraar kasta oo lagu soo saaro awood kasta oo sharci oo la xiriira furdooyinka meel kasta oo ka mid ah Jamhuuriyadda dhexdeeda.
2. **"Canshuurta Furdooyinka"** waxaa loola jeedaa canshuur kasta oo laga qaado xuduudaha Jamhuuriyadda iyo meelaha xuduudaha u furan oo ah badda, bariga iyo cirkaba.
3. **"Alaabo"** wax kasta oo ay ka mid yihiin maacunta, waxa laga ganacsado, iyo xoolaha.
4. **"Sarkaal":** waxaa loola jeedaa sarkaal ka tirsan waaxda furdooyinka.
5. "**Sarkaalka ugu habboon":** waxaa loola jeedaa sarkaal kasta oo xaqiisa ama waajib ay ku noqon karto qabashada ama sameynta falka la xusey.
6. **"Goobta Furdada"** waxaa loola jeedaa goob kasta oo Madaxa Waaxdu u magacaabey in ay tahay goob furdo.
7. **"Jamhuuriyadda":** waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaana ka mid ah guud ahaan dhulka Jamhuuriyadda iyo biyaha soo hoosgelaya khad khayaali ah oo barbar-socoda xeebaha ama jamallada kore ee badda Jamhuuriyadda ee ka kor muuqda biyaha hoose marka ay jiraan mowjadaha caadiga ah ee gu'ga iyo masaafo dhan lix mayl (*nautical miles)*.

### Qodobka 2^aad
### Canshuurta Furdooyinka Ee Ay Tahay in La Qaado

1. Canshuurta furdada waxaa laga qaadayaa badeecadaha iyo xoolaha la keeno Jamhuuriyadda ama laga dhoofiyo.

### Qodobka 3^aad
### Waaxda Furdooyinka

1. Waa in ay jirtaa waax furdooyin oo uu xukumayo agaasime uga mas'uul ah Wasaaradda Maaliyadda.

2. Adeege dowladeed kasta oo ka shaqeeya goob furdo ah waxaa marka uu joogo furdada uu hoos tegayaa Madaxa Waaxda Furdooyinka.

**Qodobka 4aad**
**Canshuurta Furdooyinka**

1. Canshuurta furdooyinka waxay noqon kartaa mid cayiman iyo mid qiima ku salaysan waxaana lagu soo rogi karaa, lagu burrin karaa waxna looga beddeli karaa sharci canshuureed oo ay ansixiyeen labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

**Qodobka 5aad**
**Waqtiga Lacagta La Bixinayo ayaa Hagaya Qiimaha (Rate) Canshuurta**

1. Haddii qiimaha canshuurta la beddelo, qiimaha canshuurta laga bixinayo alaab kasta waxay noqonaysaa qiimaha dhaqangalka ah waqtiga lacagta la bixinayo.

**Qodobka 6aad**
**Bixinta Canshuuraha iyo Lacagaha Kale**

1. Waajibka lagu bixinayo canshuurta furdada waxaa ku jiraya lacagaha kale ee lagu leeyahay alaabta, uruurintoodana waxaa mas'uuliyaddeeda iska leh madaxda furdada, lacag bixintaasina waa in ay dhacdaa ka hor inta alaabta aan laga saarin furdada.

**Qodobka 7aad**
**Mas'uuliyadda Wakiilka**

1. Qof kasta oo milkiilaha alaabo mas'uul uga ah mid ka mid ah ahdaafta sharcigan waxa uu shakhsi ahaan mas'uuliyaddeeda u qaadayaa bixinta canshuurta furdada ee ay tahay in laga bixiyo alaabta waxaana waajib ku ah in uu sameeyo dhammaan hawlaha la xiriira alaabta ee milkiilaha uu sharcigan ku waajibinayo in uu sameeyo laakiin ma jiraan wax sharcigaan ku qoran oo milkiilaha wakiilka laga yahay ka qaadaya mas'uuliyadda wax kasta oo lagu leeyahay.

## Qodobka 8aad
## Mas'uuliyadda Qofka Wakiilka Laga Yahay

1. Shakhsi kasta oo qof u wakiishay in uu ku metelo wax kasta oo la xiriira wixii alaab ah si waafaqsan ujeeddooyinka sharcigan, fal kasta oo uu ku kaco wakiilku, masuuliyadeeda waxaa iska leh shakhsiga wakiishay, waxaana ka dhalan kara ganaax si la mid ah sidii oo uu qofkaasu laftiisu sameyay falkaas, laakiin laguma xukumayo xabsi ilaa uu shakshigu qirto in uu amray dembigaa, iyada oo wax kasta oo halkaan ku xusan aanay meesha ka saaraynin in wakiilka lagu soo oogi karo dembi.

## Qodobka 9aad
## Diyaaradaha iyo Maraakiibta Dalalka Shisheeye

1. Ka dib marka la sameeyo baarista/hubinta caadiga ah ee furdada, waxaa reebban in diyaarad ama markab ka socda dalal shisheeye la fuulo ama la baaro, haddii uusan sarkaalka ku habboon ku tuhmin in diyaaradda ama markabku ay saaran yihiin alaabo shuruucda Dalka u yaal aysan oggolayn in la soo geliyo Dalka.

## Qodobka 10aad
## Saacadaha Shaqada

1. Maalmaha iyo saacadaha shaqada waxaa lagu xeerinayaa xeer-nidaamiye. Sarkaalka ku habboon waxaa uu oggolaan karaa codsi uga yimaada dadweynaha oo ay ku codsanayaan in loo adeego waqtiyo ka baxsan saacadaha loogu talogaley shaqada si waafaqsan xeer-nidaamiyeyaasha iyo bixinta ujuurooyinka u dhigan.

## Qodobka 11aad
## Muran La Xiriira Qiimeynta ama Kala-Soocid

1. Marka uu yimaado muran la xiriira qiimeynta ama kala-soocidda la xiriirta alaabo, soodejiyaha, la wareegaha, ama dhoofiyaha ama wakiilka waa in uu dhigo lacagta canshuurta ay ka dalbatey hay'adda furdooyinka waana in lacagtaasi loo arkaa in ay tahay midda ku waajibtay, haddii aan muddo labo bilood gudahood maxkamadda awoodda u leh go'aan ka duwan ka gaarin, ka dib marka uu ka dalbadado dhigaal-bixiyaha lacagta ama wakiilkiisa.

## Qodobka 12aad
## Soo-dejin Ku-meelgaar ah

1. Madaxa Waaxda Furdada waxaa uu shakhsi kasta u oggolaan karaa in uu soo dejiyo alaabo nooca ay doonto ha ahaatee isaga oo aan bixin canshuur ka dib marka uu ku qanco in alaabta noocaas ah si ku-meelgaar ah loo soo dejinaayo oo aysan ahayn mid la iibinayo. Oggolaanshaha noocaas ah waa in uu waafaqsanaadaa shuruudahan soo socda:
   a. In alaabtaas dib loogu dhoofinayo muddo saddex bilood ah oo ka bilaabata taariikhda oggolaanshaha;
   b. In qofka la siinayo oggolaanshaha uu qaddarka lacagta canshuurta ku waajibi lahayd alaabta noocaas ah uu dhigaal ahaan u bixiyo ama damaanad ahaan uu u dhigo hadba sida uu faro Madaxa Waaxda.
2. Madaxa Waaxda marka uu sabab ku filan uu helo waxa uu kordhin karaa waqtiga dib-u-dhoofinta.

## Qodobka 13aad
## Dhoofin Ku-meel-gaar ah

1. Alaabooyin waxaa si-ku-meelgaar ah loo dhoofin karaa muddo saddex bilood gudahood ah, iyada oo Madaxa Waaxdu uu kordhin karo waqtiga marka uu helo sabab ku filan.

## Qodobka 14aad
## Mamnuucidda Soo-dejinta Ama Dhoofinta Waxyaabo Gaar ah

1. Wasiirka ayaa wareegto ku soo saari kara in alaabo kasta oo uu ku cayimo wareegtada aan si ku-meelgaar ah loo soo dejin Karin sida ku cad Qodobka 12aad, ama aan si ku meelgaar ah loo dhoofin Karin sida ku cad Qodobka 13aad.

## Qodobka 15aad
## Soo-dejinta Ku-meel-gaarka ah ee Baabuurta

1. Iyada oo aan wax loo dhimin qodobadda kale ee Sharcigan, baabuurta ayaa si ku-meelgaar ah loo soo dejin karaa si waafaqsan qodobadda ku jira heshiis kasta oo caalami ah oo ay Jamhuuriyadda qayb ka tahay.

## Qodobka 16[aad]
## Shuruudo Gaar ah oo La Xiriiro Alaabo Gaar ah

1. Hadii ay jirto alaabo la mamnuucay ama la xakameeyey waxaa loo sameyn karaa shuruudo gaar ah. U hoggaansamid la'aanta shuruudaha oggolaanshaha lagu bixiyey in si kumeelgaar ah loo soo dejiyo ama loo dhoofiyo waxaa lagu muteysanayaa ciqaab sharci.

## Qodobka 17[aad]
## Alaabta Loo Isticmaalo Si Ka Soo Horjeedda Shuruudaha Gaarka Ah

1. Haddii alaabo ay ku waajibeyso canshuur oo si sharci ah loo oggolaado in lagu soo dejiyo qiimaha canshuurtuna ka yar tahay intii caadiga ahayd, ama canshuur dhaaf loo sameeyo si loogu isticmaalo hadaf gaar ah ama si gaar ah uu u isticmaal sarkaal dowladeed, iyo haddii alaabta noocaas ah loo isticmaalo hadaf kale ama si xadgudub ku ah ogolaanshihii gaarka ahaa ama uu isticmaalo shakhsi kale, alaabta noocaas ah waa in lala wareegaa ilaa canshuurtii ku waajibtay oo buuxda la bixiyo, waxaana qof kasta oo ku lug leh isticmaalka alaabta noocaas ah lagu qaadi karaa ciqaabta uu dhigayo sharciga.
2. Alaabta noocaas ah waa la iibin karaa, la wareejin karaa ama waxaa loo isticmaali karaa ahdaaf kale haddii canshuurta la qiimeeyey in ay ku waajibtey alaabta si waafaqsan qiimaha waqtiga la iibinayo, la wareejinayo ama la isticmaalayo, waa in canshuurtaas lagu bixiyay waaxda furdada.
3. Soo-dejiyuhu alaabo kasta uu soo dejinayo sida uu dhigayo Qodobkan, waxaa marka uu ka dalbado sarkaalka furdo ku uu keenayaa ama uu cadeeynayaa alaabtaas si uu ugu qanci karo Madaxa Waaxda. Haddii uu ku guul-darreysto in uu keeno alaabta noocaas ah ama uu cadeyn kari waayo, waxaa lagu soo oogayaa ciqaabta u dhigan sharciga ee la xiriirta soo gelinta sharci darrada ah.

## Qodobka 18[aad]
## Heshiis oo lagu Saxayo Is-beddelka Qiimaha Canshuurta

1. Haddii la galo heshiis la xiriira iibinta ama geynta alaabo ay canshuuri ku waajibtey, qiimaha canshuurta ay is-beddesho ka hor inta aan alaabta la geynin, haddii aaney jirin qodob si cad u tilmaamaya taas beddelkeeda, waa in sicirka la bixinaayo saamigiisa la waafajiyaa is-beddelka ku yimid canshuurta.

## Qodobka 19aad
## Dembiga Soo Gelinta Sharci Darrada ah (Smuggling)

1. Qof kasta oo:
a. Isaga oo og oo **ay** gacantiisa soo gasho ama si uun ugu lug yeesha qaadista, bixinta, meel-dhigista, qarinta ama si uun ula tacaamula alaabo isaga oo hadafkiisu yahay in uu maamulka furdada ku khiyaamo canshuur kasta oo ku waajibtey, ama
b. Isaga oo og si uun ugu lug yeesha in uu si khiyaano ah ugula dhuunto canshuur ama shuruucda iyo xannibaadaha furdada ee la xiriira soo-dejinta, dejinta, bakhaardhigista, geynta, saarista, rarista iyo dhoofinta alaabo, ama
c. Uu, diyaarad, markab, gaadiid kale ama alaabadu ay noqdaan kuwa lala wareegi karo sida ay dhigayaan shuruucda furdada isaga oo si bareer ah ugu lug yeesho falka ama waajib ka soo-bixid la'aan ka dhigta mid lala wareegi karo. Waxaa lagu qaadayaa dembiga soo gelinta sharci darrada ah (smuggling) waxaana mid kasta oo ka mid ah dembiyada oo lagu helo ka dhalan kara ciqaab aan ka yareyn saddex jibaar ama wax ka badaneyn toban jibaar canshuurtii laga qaadi lahaa alaabta waxaana lala wareegayaa dhammaan alaabta dembigaa lagu galey.
2. Qof kasta oo noocaas ah waxaa soo qaban kara oo xiri kara sarkaal kasta oo boolis ah. Haddii aan damaanad lagu sii deyn, waa in muddo afartan iyo siddeed saac gudahood ah, oo aan ku jirin waqtiga safarka halka lagu xirey ilaa maxkamadda, la hor gaynayo maxkamadda awoodda u leh una qaada dacwadda si waafaqsan sharciga.

## Qodobka 20aad
## La-wareeggida Markab ama Diyaarad

1. Haddii markab ama diyaarad ku sugan Jamhuuriyadda dhexdeeda ama badaheeda ay u hoggaansami waydo amar kasta oo sharci ah oo uu siiyo sarkaal dowladeed iyaga oo baxsanaya la ceyrsado, ama alaabtii qaar ka tuuraan oo wax yeelo soo gaarto iyagoo diidan in la qabto ama ay burburiyaan caddeymaha waxa ay tahriibinayaan, markabkaas ama diyaaraddaas waa lala wareegayaa.

## Qodobka 21aad
## Soo Gelinta Sharci Darrada ah ee Ba'an/Dhibta Badan
## (Aggrevated Smuggling)

1. Haddii qof ku howlan yahay in uu ku kaco dembi ka dhan ah shuruucda furdada yahay na mid ku hubeysan hub khatar ah, marka lagu helo dembi kasta oo furdo, wuxuu muteeysanayaa toban jibaar canshuurtii ku waajibtey alaab

kasta oo dembiga lagu galey, waxa intaas loo raacinayaa xabsi  u dhexeeya sanad ilaa seddex sano.

2. Haddii qofka noocaas ah uu adeegsado hub khatar ah isaga oo u jeedkiisu yahay in uu cid dhaawaco ama uu dhaawaco sarkaal waajibkiisa gudanaya, waxaa loogu sii darayaa in u ku muteeysto xukunka ku xusan faqradda 1aad xabsi muddadiisu aaney ka badneyn toban sano.
3. Marka dembi kasta ee ku xusan shuruucda furdada ay galaan saddex qof ama ka badan oo iska kaashanaya hadafkaas, ciqaabta dembiga noocaas ah waa in ay ahaataa mid aan ka yareyn laba-jibaarka inta ugu yar waana in qof kasta oo ka mid ah lagu qaadaa xabsi aan ka badneyn toban iyo laba bilood ama ganaax iyo xabsi u dhigma dembigaaslabada kan culus.
4. Marka qofka lagu helo dembi jebinaya sharciga furdada oo qofkaasna horey loogu helay dembi uu horey uga galay sharciga furdada, ciqaabta uu muteysanaayo qofka noocaas ahi ee lagu qaadayo dembiga uu mar labaad galay waa in aaney ka yaraan lix jibaar canshuurtii laga qaadi lahaa alaabta dembiga lagu galey, dembi kaste oo uu galo qofkaasi dembiga labaad ka dib waxa uu muteeysanayaa in loogu daro ciqaabta xabsi aan ka badneyn laba sano.

## Qodobka 22aad
## Dammaanad

1. Marka qof aan loo haysan waaran lagu soo qabto ama lagu soo xiro dembi la xiriira arrimaha furdada oo aan ciqaabtiisu ahayn xabsi oo uu qofkaasu waqti kasta diyaar u yahay inta uu xiranyahay in u bixiyo damaanad, qofkaas waa lagu sii deyn karaa damaanad.
2. Ka hor inta aan qofka la hor keenin maxkamadda awoodda u leh waa in damaanadda ay siiyaan Saraakiisha Furdada ee awoodda u leh. Lacagta damaanadda ah waa in aaney ka yaraan saddex-meelood laba meel (2/3) ciqaabta ugu badan ee dembiga loo soo qabtey ama loo soo xirey.
3. Qodobkan waa in uusan saameyn ku yeelan awoodda ay maxkamad ama cid kale ku leedahay in ay cid ku sii deyso damaanad.

## Qodobka 23aad
## La-wareegidda Gaadiidka Lagu Qaado

1. Marka gaadiid nooca uu doono ha ahaadee loo adeegsado dembi ay tilmaameen shuruucda furdada, waa in lala wareegaa marka laga reebo haddii milkiiluhu uu maxkamadda awoodda u leh ku qanciyo in gaadiidkaas aan si gaar ah loogu adeegsanin dembigaas iyo in qiimaha alaabta ay khuseyso aaney u dhigmin qiimaha gaadiidkaas.

2. Markab kasta oo culeyskiisu ka badan yahay laba boqol iyo konton tan waxa sii deyn kara sarkaalka ku habboon ka dib marka uu ku qanco in milkiilayaasha markaas ay u hoggaansami doonaan amarrada maxkamadda awoodda u leh.

**Qodobka 24aad**
**Xaraaashidda/ Ka-takhalusidda Waxyaabaha Lala Wareego**

1. Marka alaabo ama gaadiid loola wareego si waafaqsan shuruucda furdada, alaabtaas ama gaadiidkaas waxaa ay noqonayaan hanti ay leedahay Dowladda waxaana looga takhalusayaa/xaraashayaa (dispose off) sida ay u dhigaan xeer-nidaamiyeyaal uu soo saaraayo Wasiirka Maaliyadda.

**Qodobka 25aad**
**Baarista**

1. Haddii qof uu sarkaal ku daba-joogo la qabto isaga oo faraha kula jira dembiyo uu dhigayo sharciga furdada, waxaa uu sarkaalkaas isaga oo aan haysan waaran adeegsan karaa dhammaan awoodihii uu lahaan lahaa in uu adeegsado haddii uu heli lahaa amarka uu dhigayo Qodobka 97aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga, waase in uu warbixin ku siiyaa maxkamadda awood u u leh labaatan iyo afar saac gudahooda marka uu awooddaas adeegsado.

**Qodobka 26aad**
**Xuquuqda Roondo-sameynta**

1. Sarkaalka, marka uu shaqada ku jiro, waxaa uu roondo ku sameyn karaa oo uuna si xor ah u dhinac mari karaa una kor mari karaa una geli karaa meel kasta oo Jamhuuriyadda ka mid ah marka laga reeebo guri ama dhismayaal kale oo la deggan yahay, sarkaalka noocaas ah ee roondada sameynaya laguma qaadi karo eed, tallaabo ama dacwad la xiriirta roondada uu sameeyey.

**Qodobka 27aad**
**Qiimeynta Alaabta**

1. Xeerarka loo adeegsanayo qiimaynta alaabta iyada oo ujeedku yahay ganaaxa ama canshuurta ku waajibtay waxaa qeexaya xeer-nidaamiyeyaal uu soo saarayo Wasiirka Maaliyadda, hadba heer xukuumadeedka u xilsaaran si waafaqsan Qod.50aad (b) ee Dastuurka KMG ah.

## Qodobka 28aad
## Xeer-nidaamiyeyaasha

1. Wasiirka Maaliyadda waxaa uu soo saari karaa xeer-nidaamiyeyaal lagu kobcinayo, laguna wanaajinayo oo sida ugu wanaagsan loogu hirgelinayo qodobadda ku jira sharcigan, iyada oo aanay saamaynayn qodobbada sare ee sida guud u hadlaya, oo ay ka mid yihiin:

a. Shuruudaha dhoofinta ku-meelgaarka ah iyo qiimeynta canshuurta alaabooyinka dib loo soo dejiyo;
b. Shuruudaha soo-dejinta ku-meelgaarka ah iyo qiimeynta canshuurta laga bixinaayo dib-u-dhoofinta;
c. Waajibaaddka saaran milkiilayaasha, madaxda, wakiillada iyo shakhsiyaadka kale ee la xiriira imaanshaha, soo-sheegidda, raridda, dejinta, habraaca imaanshaha iyo bixidda, koridda ama ka degidda rakaabka, baarista shakhsiyaadka, maraakiibta, diyaaradaha, baabuurta iyo dhismayaasha ama goobaha, awoodaha ay u leeyihiin in ay amarro waajib ah siiyaan, in ay shakhsiyaad ka soo qabtaan ama ka soo xiraan maraakiib, diyaarado, baabuur ama gaadiid kasta oo kale;
d. Sameynta iyo hawlgelinta bakhaarrada iyo goobaha furdooyinka, ee wax la dhigo lagana qaato alaabta iyo shuruudaha iyo habraaca ay tahay in ay ilaaliyaan shakhsiyaadka ka shaqeeya ama isticmaala bakhaarrada;
e. Ganacsiga ka dhexeeya dekadaha dalka dhexdooda;
f. Ganacsiga dalka sii mara ee dal kale ku wajahan (Ganacsiga Transitka ah);
g. Soo-dejinta iyo dhoofinta badeecooyinka;
h. Soo-dejinta iyo dhoofinta loo adeegsado boostada;
i. Awoodaha, hawlaha iyo waajibaadyada saraakiisha oo ay ka mid tahay awoodda barista shakhsiyaadka, maraakiibta, diyaaradaha, baabuurta iyo dhismayaasha ama goobaha, awoodahooda amarsiinta, qabashada ama xiridda shakhsiyaadka ama alaabta;
j. La-wareegidda alaabo, maraakiib, diyaarado ama gaadiid lala xiriiriyo dembiyada ama ka baxsashada shuruucda furdada;
k. Dukumentiyada ay tahay in ay uruuriyaan iyo ujuurooyinka ay tahay in ay bixiyaan shakhsiyaadka ee la xiriira hawlgallada furdada;
l. Dibaajiyada (bonds) iyo damaanadaha kale, shuruudaha la xiriira iyo sida loola wareegayo, sii-hayntooda ama lacagayntooda;
m. Alaaabada laga tago ama la dayaco iyo habraaca la xiriira;
n. Saacadaha shaqada ee xafiisyada furdada iyo joogitaanka saraakiisha ka shaqeeya, ujuurooyinka ay tahay in lagu bixiyo waqtiga dheeraadka ah (overtime) ee la shaqeeyo iyo kharashaadka kale ee soo baxa;
o. Sharikadaha soo dejinta iyo raridda badeecadaha,

## QEYBTA 2AAD
## TARIIFADA FURDOOYINKA

### Qodobka 29aad
### Canshuurta Alaabta Waxyeeladda soo Gaartay

1. Canshuur cayiman waa in lagu soo rogaa alaabta la soo dejiyo iyada oo aan loo eegin sida ay tahay xaaladdeeda; waa in aan canshuurta gebi ahaan ama qayb ahaan looga dhaafin haddii ay alaabta soo gaarto dhibaato sabab kasta ha ku timaaddee.
2. Canshuur dhimis ayaa loo sameynayaa alaab la soo dhoofiyey oo dhibaato soo gaartey marka xisaabinta canshuurta ay ku saleysan tahay 'qiimaha alaabta': Milkiilaha alaabta dhibaatadu soo gaartey ayaa xaq u leh in alaabta la burburiyo isaga oo kharashka burburintaas la baxaya taas oo ku xiran taxaddarada ay waajibiyeen madaxda furdooyinka.

### Qodobka 30aad
### Canshuurta soo Dejinta ee Ku Saleysan Miisaanka

1. Canshuurta soo dejinta ee alaabta canshuurta ku waajibtey loo cayimey si waafaqsan miisaankooda, waa in lagu saleeyaaa miisaanka guud ee alaabtaas, marka laga reebo haddii si kale loogu waajibiyo tariifadda.
2. Miisaanka guud waa miisaanka alaabta iyo xirmooyinkooda.
3. Miisaanka saafiga ah waa miisaanka alaabta ka dib marka laga saaro xirmooyinka iyo cabeynta.
4. Qaddarka canshuurta "qiimaha" ku saleysan waa in qiimeynteeda lagu saleeyaa qiimaha alaabta ay canshuurtu ku waajibtey, sida ay dhigayaan qodobbada soo socda ee sharcigan.
5. Mar kasta oo tariifad ay dhigeyso canshuur cayiman iyo sidoo kale mid ku saleysan "qiimaha", waa in ay ku waajibtaa labadaba.

### Qodobka 31aad
### Dalka Asal Ahaan Ay Ka Soo Jeedo iyo Dalka Laga Soo Rarey

1. Dalka asal ahaan ay alaabtu kasoo jeedo, waa dalka alaabta lagu sameeyey ama qeybtii ugu dambeeysay lagu farsameyay soo saaristeeda.
2. Dalka laga soo rarey waa dalka alaabta lagu keydiyey, waase haddii dalkaasi lacagta loo shubey.

**Qodobka 32aad**
**Kala Soocidda Alaabta**

1. Alaabta waa in loo kala soocaa si waafaqsan madaxyada Tariifooyinka. Cinwaannada Qaybaha, Cutubyada iyo, Cutub-hoosaadyada ayaa loo kala bixiyey si uu u fududaado tixraaca oo keliya, maaddaama kala-soocidda lagu go'aaminayo keliya ereyada madaxdaya gaarka ah ee Tariifooyinka iyo Qoraallada Qaybaha ama Cutubyada ee u habboon ee ku dhex jira Tariifada.
2. Marka alaabo lagu kala sooci karo labo madax ama wax ka badan, madaxyada tariifada, kala-soocidda waa in loo sameeyaa sidan soo socota:
   a. Cinwaanka bixinaya tilmaanta ugu sugan waa in laga door-bidaa cinwaannada bixinaya tilmaamaha guud;
   b. Alaabta kala duwan ama isku jira oo ka kooban agab kala duwan ama laga sameeyey cunsurro (components) kala duwan, waa in loo soocaa sidii in ay ka kooban yihiin agabka ama sheyga alaabta siinaya tilmaanta aasaasiga ah, waase haddii aan lagu kala sooci karin iyada oo la tixraacayo farqadda *a.*
   c. Marka alaabta la kala sooci karin iyada oo la tixraacayo farqadda *a.* ama *b.,* waa in lagu kala soocaa cinwaanka la halmaala qiimaha canshuurta ugu badan waxaana, haddii qiimaha canshuurtaas ay isku mid ka yihiin wax ka badan hal cinwaan, cinwaanka ugu dambeeya ee Tariifada ku jira.
3. Alaabta aan hoos geleynin cinwaan Tariifo waa in lagu soocaa cinwaanka ku habboon alaabta ay isugu dhow yihiin. Qodobada kore waxaa sidoo kale lagu saleynayaa go'aaminta cinwaan-hoosaadka ugu haboon isla halkaa cinwaan gudihiisa ah.

**Qodobka 33aad**
**Qiimaha La Canshuurayo**

1. Canshuurta dhoofinta alaabta ee ku saleysan qiimaha alaabta waa in loo xisaabiyaa iyada oo la adeegsanayo qiimaha la canshuurayo ee waqtigaas jira, tusaale ahaan, qiimaha waqtigaas ay ka joogto suuqa degaanka ee dalka laga soo iibsadey, oo lagu darey lacagta lagu soo qaadey, dillaalka, bakhaar-dhigidda, iwm., ilaa laga soo gaaro xafiiska furdada ee ku yaalla dekadda ay ka soo degayso ama ay ka baxayso.

**Qodobka 34aad**
**Canshuur ku Saleysan Qiimaha Alaabta**

1. Canshuuraha ka waajibay soo dejinta alaabta waa in lagu saleeyaa qiimaha alaabta canshuurta laga qaadayo, qiimahasna waa in uu noqdaa qiimaha caadiga ah ee hoos ku dhigan.

## Qodobka 35aad
## Qiimaha Caadiga Ah

1. Qiimaha caadiga ah waa in uu noqdaa qiimaha loo arki karo in lagu heshiiyey alaabta la soo dhoofiyey, kaas oo ka dhashey iib ku dhacay xaalado tartan buuxa oo u dhexeeya iibsade madax-bannaan iyo iibiye madax bannaan ee dhacay taariikhda alaabta la baarayo.
2. Haddii baarista noocaas ah ay ku dhacdo waqtiga lagu xaddidey xeer nidaamiyeyaasha furdada in furdada loogu soo gudbiyo cadeynta (declaration), madaxda furdomada way diidi karaan kala duwanaanshaha qiimaha ee jira.
3. Qiimaha caadiga ah ee alaabta la soo dhoofiyey waa in loo qiimeeyaa sidan soo socota:
   a. Alaabta waxaa loo tixgeliyanayaa in iibsadaha lagu guddoonsiiyey dekadda ama goobta laga soo galo dalka ee dhulka furdada ee Jamhuuriyadda.
   b. Iibiyaha waxaa loo tixgelinayaa in uu dusha u rito oo uuna qiimaha ku darsado dhammaan kharashaadka la xiriira iibinta iyo geynta alaabta ee ilaa dekadda ama barta laga galo dalka.
   c. Canshuurta furdada iyo canshuuraha kale ee dhulka Soomaaliyeed waa in loo tixgeliyaa in laga qaadayo iibsadaha sidaa daraaddeedna waa in aan lagu darin qiimaha caadiga ah.

## Qodobka 36aad
## Iib Ku Dhaca Tartan Furan

1. Iib waxaa loo tixgelinayaa in uu ku dhacay xaalado tartan buuxa ku dhisan oo dhex marey iibsade madax-bannaan iyo iibiye madax-bannaan marka:
   a. Bixinta qiimaha lagu iibsanayo alaabta ay tahay shuruudda keliya ee xireeysa dhameeystirka heshiiska iibka.
   b. Qiimaha lagu heshiiyo aaney saameyn ku lahayn xaaladaha ganacsi, maaliyadeed ama xaalado kale, haddii lagu xuso ama lagu xusin qanadaraaska, marka laga reebo shuruudaha, iibinta daraaddeed, u dhex mara iibiyaha ama shakhsi caadi ah ama shakhsi qaanuuni ah oo xiriir ganacsi la leh iibiyaha oo dhinac ah, iyo iibsadaha ama shakhsi caadi ah ama shakhsi qaanuuni ah oo xiriir ganacsi la leh iibsadaha oo dhinaca kale ah.
   c. Aaney jirin qayb ka mid ah faa'iidada laga sameeyey dib-u-iibinta, sii-wareejinta ka dambeysa ama ka-faa'iideysiga alaabta urureysa taas oo si toos ah ama si aan toos ahaynba uu iibiyaha ama shakhsi caadi ah ama shakhsi qaanuuni ah oo xiriir ganacsi kala dhexeeyo iibiyaha.
2. Laba qof waa in loo tixgeliyaa in uu xiriir ganacsi ka wada dhexeeyo haddii midkood uu wax ku leeyahay ganacsiga midka kale ama haddii labadooduba ay

wax ku wada leeyihiin ganacsi uu wado mid ka mid ah labada, iyada oo aan loo eegin in ay tahay wax ku lahaansho toos ah ama mid aan toos ahayn.

## Qodobka 37aad
## Qiimaha ku Saleysan Tirada Alaabta

1. Haddii qiimaha caadiga ah uu ku xiran yahay tirada alaabta ay tahya in la iibiyo, qiimahaas caadiga ah ee la soo sheegey ayaa lagu go'aaminayaa qiyaasta ah in iibintu ay la xiriirto tirada alaabta la soo gudbiyey ee ay tahay in la qiimeeyo.

## Qodobka 38aad
## Qiimeynta iyo Batantaha

1. Marka alaabta la rabo in la qiimeeyo oo:
   a. loo soo saaro si waafaqsan nidaamka batantaha (patented) ama lagu ilaaliyey nooc ama nakh-shad ama xuquuq diiwan gashan;
   b. ay leedahay calaamad ganacsi oo ajnebi oo loona soo dhoofiyey in lagu iibiyo calaamaddan ganacsi, xataa haddii sii hagaajin kale lagu sameeyo.
2. Qiimaha caadiga ah waxaa la go'aaminayaa iyada oo la tixgelinayo in qiimahan uu ku jiro qiimaha xuquuqda ka-faa'iideysiga batantiga, nakh-shadda ama nooca ama xuquuqda ama calaamadda ganacsi ee ay leedahay alaabtaasi.

## Qodobka 39aad
## Qiimaha Caadiga ah ee Iibka

1. Marka alaabta la soo dejiyo lagu iibiyo xaalado tartan furan ku saleysan oo uu iibiye madax-bannaan ka iibiyo iibsade madax-bannaan, qiimaha la bixiyey ama la bixin doono ee iibka daraaddii ah ayaa loo tixgelin karaa in uu si sax ah u tilmaamayo qiimaha caadiga ah ee looga soo hadley Qodobka 35aad ee kore.
2. Kharashaadka raridda, xamuulka, caymiska, khidmadda iyo dhammaan kharashaadka kale ee la xiriira iibka, diridda iyo geynta alaabta ilaa laga gaaro dekadda ama goobta laga soo galo dhulka Jamhuuriyadda waa in lagu daraa, haddii aan horeyba loogu darin qiimaha qaan-sheegga; qiimaha canshuurta laga qaadayo waa in sidoo kale lagu daraa sicir-dhimista qeyru-caadiga ah iyo hoos-u-dhigista kale ee Qiimaha alaabta ee qeyru-caadi ah iyada oo aay jirto xaalad tartan furan.
3. Wax-ka-dhimista qiimaha ee wakiillada gaarka ah iyo iibiyeyaasha kale ee u dhexeeya waa in sidoo kale la tixgeliyaa si loogu daro qiimaha canshuurta.

**Qodobka 40aad**
**Qiimeynta Qiimaha Caadiga ah**

1. Kharashaadka lagu xusey Qodobka 35aad (b) ee qiimeynta qiimaha caadiga ah waa in ay ku jiraan:
   a. Xamuulka
   b. Caymiska
   c. Khidmadda
   d. Dilaalka
   e. Kharashaadka lagu galo dibadda ee la xiriira diyaarinta dukumentiyada looga baahan yahay si alaabta loogu soo dejiyo dhulka Jamhuuriyadda, oo ay ka mid yihiin ujuurooyinka rasmiga ah;
   f. Lacagaha iyo canshuuraha kale ee lagu soo rogo alaabta ee ay tahay in dalka dibaddiisa lagu bixiyo, marka laga reebo kuwa canshuur dhaafka loo sameeyay ama lacagta loo celinayo ama ay tahay in loo celiyo;
   g. Kharashaadka rarridda;
   h. Kharashaadka kale ee la galo ee la xiriira iibinta, diridda iyo geynta alaabta ilaa laga gaaro dekadda ama barta laga soo gelayo ee furdada dhulka Jamhuuriyadda.
2. Qiimaha canshuurta laga qaadayo alaabta waa in uu ka mid ahaadaa qiimaha xirmooyinka gudaha iyo kuwa dibadda iyo cabeynta guud ahaan.

**Qodobka 41aad**
**Kharashka Xamuulka**

1. Marka ay u jeedadu tahay xisaabinta kharashka xamuulka, dekadda ama barta laga soo gelayo ee furdada dhulka Jamhuuriyadda waa in ay noqotaa:
   a. Marka alaabo badda la soo mariyey la soo dejiyo, dekadda ay u socoto;
   b. Marka alaabo dhulka ama hawada la soo mariyey la soo dejiyo, xafiiska furdada ee ugu horreeya.

**Qodobka 42aad**
**Bedelaada Lacagaha Qalaad**

1. Marka waxyaalaha canshuurta ku waajibtey lagu saleeyay lacag qalaad, waa in shilin Soomali loo rogaa iyada oo la isticmaalayo heerka rasmiga ah ee sarifka ee jira maalinta kormeerka alaabatu la bilaabayo.

## Qodobka 43aad
## Caddeynta Qiimaha Alaabta

1. Haddii cadeynta marka la sameeyo aan isla markiiba la baarin alaabta, milkiilaha alaabtu waa in uu u cadeeyaa maamulka furdada qiimaha alaabta la canshuurayo ee loo qiimeeyey si waafaqsan qodobadda kore waana in uu sixitaanka loo baahan yahay ku sameeyaa cadeyntii hore taas oo ku timid isbeddello ku yimid qiimaha.
2. Waa in uu sidoo kale bixiyaa macluumaad kasta iyo qaan-sheegta, xamuulka iyo dukumentiyada kale ee ganacsi ee la xiriira iibka, soo raridda iyo keenista alaabta ee ay hay'adaha furdada ugu baahan yihiin qiimeynta qiimaha la canshuurayo alaabta.
3. Waajibaadyada kor lagu xusay ee quseeya alaabta dhan ay tahay in lo soo bandhigo furdada, oo ay kujiraan alaabta canshuur-dhaafka loo sameeyo iyo kuwa laga qaado canshuuro gaar ah.
4. Qaan-sheegta waa in ay la socotaa qoraal uu saxiixay soo-dejiyahu ama dhoofiyahu, oo sheegeysa in xogta ku qoran qaan-sheegtan ay sax tahay. Marka lagu daro nuqulka asalka ah, waa in nuqul labaad oo qaan-sheegta ah la socotaa, oo lagu lifaaqayo dukumentiga asalka ah ee furdada ku fasaxayaan alaabta.
5. Maamulka furdooyinka waxaa ay qaadi karaan tallaabooyinka ay u arkaan in ay lagamamaarmaan tahay si ay u eegaan qiimaha canshuurta ku waajibtey alaabta.
6. Wasaaradda Maaliyadda ayaa diyaarineeysa jadwallada canshuurta ku waajibtay alaabta oo loo adeegsan karo hadii qaansheegta asalka ah ama dukumentiga kale ee sheegaya in "qiimahii caadiga ah" aan la heli karin ama marka qaan-sheegyada iyo dokumentiyada la soo gudbiyey aan la aqbali karin si loogu saleeyo "qiimaha caadiga ah".

## Qodobka 44aad
## Dukumeentiyada Furdada ku-meel-gaarka ah

1. Haddii milkiilaha alaabta uusan keeni karin dukumentiyada loo baahan yahay oo ay la socoto cadeeynta, maamulka furdada waxaa uu alaabta ku fasixi karaa dukumentiyo furdo oo ku-meelgaar ah (iyada oo qiimeynta dib loo dhigayo) oo la heli karo wax aan ka badneyn 30 maalmood iyada oo laga dhigayo dibaaji la mid ah canshuurta furdada ee la xisaabiyey iyada oo sal looga dhigayo qiimaha alaabta la nooc ah oo horey dad u soo martey oo lagu darey 20% (labaatan boqolkiiba). Marka uu dhammaado waqtiga ay madaxda furdada u qabteen in la soo gudbiyo dukumentiga, canshuurta furdada waa in la bixiyaa iyada oo lagu saleynayo qiimaha ay madaxda furdoku ku qiimeeyeen oo lagu darey labaatan boqolkiiba.

**Qodobka 45aad**
**Cabbeynta**

1. Xirmooyinka iyo cabeeynta alaabta waa in canshuur gaar ah laga qaadaa marka qiimahoodu uu ka badan yahay qiimaha alaabta.

**Qodobka 46aad**
**Alaabta La Isku Soo Cabbeeyey**

1. Marka qiimaha ama miisaanka xirmooyinka sare ay tahay in lagu daro qiimaha oo canshuurta waajibtay ama miisaanka ee alaab laba ama ka badan ah oo isku-cabeeyay laakiin qiimaha canshuurta ee laga qaadayo ay kala duwan tahay ama shuruudaha lagu qiimeynayo canshuurtooda ay kala duwan tahay, markaas qiimaha ama miisaanka noocaas ah waa in si saamigal ah loogu kala qeybiyaa alaabta kala duwan iyada oo loo eegayo qiimaha ama miisaanka alaabta iyada oo aan laga jareynin qiimaha ama miisaanka xirmooyinka sare, alaabo kasta oo isku mid ahba waxaa loo tixgelinayaa in ay gaarkeeda loo cabbeeyay.

**Qodobka 47aad**
**Mamnuucista**

1. Adeegsiga tariifada waa in aan loo qaadan in ay meesha ka saareyso qodobbada kale oo sharciga ah ee mamnuucaya, xaddidaya ama si kale u nidaaminaya soo-dejinta, dhoofinta ama sii gudbinta alaabada qaarkood.
2. Alaabta kuwa ay qodobo sharci oo gaar ah dartood aan loo keeni karin dhulka Jamhuuriyadda waa in dib looga dhoofiyaa dalka iyada oo uu kharashkana qabo milkiilaha.
3. Alaabta ay xafiisyadda dowladda ee ku shaqada leh, hadii ay u arkaan in ay dhibaato u leedahay caafimaadka dadweynaha, waa in waqtigii loo cayimey gudihiisa dib looga dhoofiyaa ama lagu burburiyaa iyada oo kharashkuna uu qabo milkiilaha.

**Qodobka 48aad**
**Canshuur-dhaafka Furdooyinka**

Alaabtan soo socota waxaa laga dhaafayaa canshuurta soo dejinta iyada oo lagu saleynayo shuruudaha loo cayimey:

1. Waxyaabaha ay leeyihiin Dalalka iyo Madaxda Dalalka ajnebiga ah oo u yimid in ay joogaan Soomaaliya, si ku saleysan wax is weydaarsi dibloomaasiyadeed ee labada dal ka dhexeeya.

2. Waxyaabaha iyo baabuurta ay leeyihiin wakiillada diblomaasiga iyo qunsuliyadaha ee laga aqoonsanyahay Jamhuuriyadda Soomaaliyeed, si ku saleysan wax is weeydaarsi dibloomaasiyadeed ee labada dal ka dhexeeya, waxyaabaha lagama maarmaanka u ah aasaasidda hore ee xafiisyada diblomaasiga iyo qunsuliyadaha, baabuurta iyo waxyaabaha kale ee hawsha rasmiga ah loo adeegsanayo, si ku saleysan wax is weeydaarsi dibloomaasiyadeed ee labada dal ka dhexeeya.
3. Waxyaabaha iyo baabuurta ay leeyihiin wakiillada, saraakiisha iyo khubarrada Qaramada Midoobey, Hay'adaheeda Gaarka ah iyo Ururrada Caalamiga ah sida ay dhigayaan Heshiisyada lagu oggolaadey Sharci. Waxyaabaha iyo gaadiidka loo adeegsanayo hawlaha rasmiga ah ee Ururrada Qaramada Midoobey, Hay'adaheeda Gaarka ah ama Ururrada Caalamiga ah iyo waxyaabaha iyo baabuurta lagama maarmaanka u ah hirgelinta mashaariicda Soomaaliya ay Hay'adahaas uga fulinayaan si waafaqsan Heshiisyo lagu ansaxiyey Sharci. Marka laga reebo oggolaansho ka ballaaran oo lagu oggolaadey Heshiisyo loo rogey Sharci, waxaa loo oggol yahay hal baabuur saddexdii sanaba mar khubarrada haysta heshiis shaqo oo aay lacagtooda bixiyaan Dowlado ajnebi ah ama Ururrada Caalamiga ah, si loo hirgeliyo barnaamijyada hormarineed ee dhinaca farsamo ee laba-geesoodka ah ee ka socda Soomaaliya. Canshuur-dhaafka waxaa bixiya Wasaaradda Maaliyadda marka oggolaansho hore looga helo Wasaaradda Arrimaha Dibadda. Furdada waxaa uu oggolaanayaa iibinta ama ka-takhalusidda kale ee waxyaabaha ama baabuurta canshuur-dhaaf ay si sharci ah ku soo dejisteen shakhsiyaadka ama loo soo dejiyay ahdaaf aan ahayn kuwiii markii hore la sheegey ka dib marka la bixiyo canshuurta ku waajibtey si waafaqsan qiimaha alaabta ama baabuurta waqtiga la iibinayo ama laga takhalusayo.
4. Alaabta si shaqsi ah loo leeyahay, qalabka guryaha, raadiyeyaasha, rikoodhada, kaamaradaha sawirka/fiidiyowga, kaamaradaha shaneem-ooyinka, TV-yada iyo borojectarrada/*projectors* (8 mm), hubka sharcigu oggolyahay sida kan ciidanka ama sida gaarka ah loo leeyahay, teebabka, harqaamada, agabka guryaha, qalabka iyo aaladaha xirfadlayaasha marka laga reebo baabuurta ee ay leeyihiin shakhsiyaadka degganaansho ka qaadanaya Soomaaliya sababtu waxa ay doonto ha ahaatee, waase in waxyaabahaasi dhammaantood ay yihiin kuwo horey loo isticmaaley oo aaney ka sarreyn maqaamka qofka ay khuseyso. Alaabtaa ayaa la soo dejin karaa iyada oo marar kala duwan la soo rarayo lix bilood gudahooda oo ka bilaabma taariikhda uu qofku imaanayo Soomaaliya. Canshuur-dhaafka waa in uu oggolaadaa maamulka furdada ka dib marka loo soo gudbiyo codsi uu la socdo liis mid mid u sheegaya alaabta la soo dhoofinayo oo iskumar ama marar kala duwan la soo kala rarayo, iyo sidoo kale waraaq muujineysa in uu

qofku deggan yahay dalka oo ay soo saarto dowladda hoose ama dokumenti kaas u dhigma.

5. Waxyaabaha shakhsi ahaan loo leeyahay, hubka sharcigu oggolyahay sida kan ciidanka ama sida gaarka ah loo leeyahay, kaamaradaha sawirka/fiidiyow, kaameradaha shaneemooyinka (8 mm), TV-yada, harqaamada iyo teebabka, qalabka iyo agabka guryaha, iyo buugaag tiro yar iyo dharka lagu goglo sariirta iyo kuwa la saaro miisaska ee ay la yimaadaan, waa in dhammaan qalabkaasi ay yihiin kuwo horey loo isticmaalyey oo aaneyna ka sarreyn maqaamka qofka ay khuseyso.
6. Dharka, agabka loo isticmaalo jilidda iyo agabka riwaayadaha ee jilayaasha iyo fannaaniintu ay la yimaadaan, qalabka ay isticmaalaan kuwa dadka madadaaliya iyo xayawaannada qaybta ka ah madadaalada dadweynaha loo soo bandhigo. canshuur-dhaafka waa in loo sameeyaa ka dib marka maamulka furdada loo soo gudbiyo liis ay mid-mid ugu qoran yihiin alaabta kor lagu soo sheegey.
7. Waxyaabaha lagu tabarruco ee loo adeegsado ku-dhaqanka iyo faafinta diinta Islaamka ee aan ahayn ganacsi.
8. Daabacaadaha iyo waxyaabaha kale ee si toos ah loogu deeqo macaahidda iyo ururrada dhaqanka iyo waxyaabaha loo isticmaalayo ahdaaf cilmi-saynis ama dhaqan.
9. Naamuunado alaabo taas oo aan si toos ah loo isticmaali karin
10. Daabacaadaha, xusuus-qorrada, kalandaariyeyaasha, buugaagta yaryar, kaararka boostada, boostarrada, boorarka, taarikada birta ah, albumada, kataloogyada sawirrada leh iyo kataloogyada kale, iyo liisaska qiimayaasha ee lacag la'aanta lagu qeybinayo ee loogu talogaley dalxiis ama ganacsi.
11. Faranga-boolooyinka, waraaqaha faranga-booleysan, lacagta daabacan iyo qoraallada kale ee wax lagu amaahdo.
12. Alaabta si toos ah ay u soo dejiso Dowladda ama ay iibsatey markii ay yimaadeen laakiin ka hor inta aan laga saarin furdada. Labaddan arimood tan dambe, canshuur dhaafka waxaa loo oggolaanayaa keliya marka la soo gudbiyo oggolaansho ay soo saartey Wasaaradda.
13. Agabka loogu baahan yahay qabanqaabinta Sahanka Ayaxa Deegaanka Waxyeelleeya (*Desert Locust Survey*), ee loo adeegsado ololaha wax ka qabashada ayaxa iyo ololaha ciribtirka mallaariyada (duumada) ee loogu tabarrucay Dalka ama ay keentay hay'ad dowladeed.
14. Hadyadaha iyo gargaarka mootka iyo noolka ah ee la gaarsiinayo dadka ay taabteen aafooyinka guud.
15. Lugaha iyo gacmaha macmalka ah iyo kuraasta lugaha leh ee ay naafadu adeegsato.

16. Agabka u gaarka ah ee loogu talogaley in ay isticmaalaan dadka baahiyaha gaarka ah qaba ama wax lagu barayo, oo ay soo dejiyeen hay'adaha samafal ee waxtarka u leh ama hay'adaha samafal ee iyaga u shaqeeya.
17. Matoorrada, qalabkooda dayactirka, iyo agabka loo isticmaalo dhisidda maraakiibta, calanka ay doonaan ba badda ha ku maraane.
18. Xayawaanno dab-joog ah, lab iyo dheddigba, oo loo soo xuley taran iyo xayawaannada dab-joogga ah ee loo adeegsado beeraha.
19. Geedaha nool iyo dhirta kale, laamaha yaryar ee la tallaalo, tallaalada kale ee la xabaalo, qaar ka mid ah abuurka oo loogu talogaley dalagyada beeraha iyo kuwa jikada, bacrimiyeyaasha iyo sunta disha ku-dul-noolayaasha ee gebi ahaanba loo adeegsanayo beeraha, waase in si toos ah ay u soo dejiyaan beeraleyda ay khuseyso ama in la caddeeyo in si buuxda loogu adeegsanayo beeraha.
20. Qalabka xirfadda kalluumeysiga, laakiin kuma jiraan qalabka kalluumeysiga isboortiga ah.
21. Agabka keydka maraakiibta, oo aaney ku jirin alaabta maanabooliyada ah, ee gebi ahaanba ay isticmaalayaan rakaabka iyo shaqaalaha markabka, ee la isticmaalayo inta safarka lagu jiro iyo inta ay maraakiibtu ay joogaan dekad ama meelaha ay barroosinku u yaallo, taas oo ku xiran ballanqaadyada iyo xaddidaadaha ay u dhigeen maamullada furdada.
22. Agabka wax lagu cabeyo iyo cabeynta wax lagu xirxiro nooca ay doonaan ha ahaadeen ee loogu baahan yahay gaadiid-ku-qaadista miraha iyo khudaarta la rabo in la dhoofiyo; taas oo hadba ku xiran ballanqaadyada ay u dhigeen maamullada furdada.
23. Dhalooyinka, baakadaha, gasacadaha iyo weelasha kale ee cuntada la rabo in la dhoofiyo, taas oo hadba ku xiran ballanqaadyada ay u dhigeen maamullada furdada.
24. Shidaalka iyo garaasada loogu talogaley:

a. Maraakiibta baxaya ee ka hawlgalaya dibadda biyaha dalka;
b. Diyaaradaha baxaya ee u socda dibadda oo ay ka mid yihiin kuwa ku sii degaya meelo kale oo ka mid ah dhulka Soomaaliya.

25. Naxashka ama sanduuqa lagu shubo waxyaabaha ka hara meydadka ee loo soo qaadayo Soomaaliya, iyo waxyaabaha kale ee lagu qurxinayo. Canshuur-dhaafka ayaa waxaa oggolaanaya maamulka furdada marka loo soo gudbiyo oggolaanshaha ay soo saareen hay'adaha ku shaqada leh.
26. Ubaxyada iyo waxyaabaha kale ee lagu qurxiyo xabaalaha ku yaalla Soomaaliya.
27. Alaabta la xaqiijiyey in ay asal ahaan Soomaaliya ka soo jeedaan.Canshuurdhaafka noocaas ah waxaa la siinayaa milkiilaha alaabta ee isaga oo wakiil laga yahay dhoofinta la soo sameeyey, taas oo ku xiran in la

soo gudbiyo dukumentiga furdada lagu soo mariyey iyo iyada oo ku xiran in alaabta dib loogu soo dhoofinayo sanad gudihiisa oo ka bilowda taariikhda ku qoran dukumentiga.

**Qodobka 49aad**
**Canshuur Dhaafka Alaabta La Dhoofinayo**

Alaabtan soo socota waa in laga dhaafaa canshuurta dhoofinta si ku xiran shuruudaha la cayimey:

1. Waxyaabaha shakhsi ahaan loo leeyahay oo ay ka mid yihiin baabuurta, qalabka guryaha, raadiyeyaasha, rikoodhada, kaamaradaha sawirka, kaamaradaha fiidiyowga iyo borojectarrada/*projectors* (8 mm), hubka, teebabka, harqaamada, agabka guryaha, agabka iyo qalabka xirfadlayaasha, iyo galabka guryaha ee ay leeyihiin shakhsiyaadka dibadda degaya sababta ay doonto ha ka keentee, waase in alaabta ay dhammaanteed ahaataa mid la isticmaaley aaneyna ahayn kuwo ka badan maqaamka qofka ay la xiriiraan.
2. Waxyaabaha ay shakhsi ahaan u leeyihiin dadka safarka ah, hubka, kaamadaraha sawirka, kaamarahada fiidiyowga (8 mm), harqaamada iyo teebabka, qalabka guryaha iyo qalabka shakhsi ahaan loo sidan karo, iyo buugaag tiro yar iyo dharka lagu goglo sariirta iyo dharka la saaro miiska ee ay sii qaadanayaan, waase in dhammaan waxyaabahaasi ay yihiin kuwo la isticmaaley oo u qalma maqaamka milkiilaha.
3. Maqaasiinta ku dhex yaala maraakiibta ee ay isticmaalayaan rakaabka iyo shaqaalaha markabka, inta maraakiibtu joogaan dekadaha ama waddooyinka Jamhuuriyadda ka tirsan, taas oo ku xiran shuruudaha ay u dhigeen maamullada furdada.
4. Xirmo boosto lagu diro oo uu qiimaheedu ka badneyn $50 (konton).
5. Naxashka ama Sanduuqa lagu shubo waxyaabaha ka hara meydadka ee loo dirayo dibadda, iyo waxyaabaha kale ee lagu qurxinayo taas oo ku xiran in oggolaasho ka haystaan hay'adaha ku shaqada leh.

**Qodobka 50aad**
**Canshuurta shaabadda**

1. Iyada oo la raacayo Wareegtadii Sharci Lr.6 ee soo baxdey 7 Disembar 1966 ee ku saabsaneyd canshuurta shaabadda, canshuurtaas waxa si aan toos ahayn loogu dalacayaa dukumentiyada uu saaro maamulka furdada. Qiimaha qiimaha canshuurta shaabadaha wasiirku wuxu ku soo saarayaa xeer nidaamiye.

## Qodobka 51aad
## Lacagaha Ku Waajibay Bakhaarada

1. Lacagaha ka waajibey bakhaarrada ee la xiriira keydinta muddada kooban ee alaabta lagu keydiyo bakhaarrada furdada waa in ay noqdaan sidan soo socota:
   a. Ilaa toban maalmood oo ay ku jiraan maalinta ay soo gashey iyo tan ay ka baxdey waa lacag la'aan;
   b. Laga bilaaabo maalinta kow iyo tobanaad: $ 0.30 oo laga bixiyo 100 kg. maalintii;
   c. Laga bilaabo maalinta kow iyo tobanaad, alaabta la dhoofinayo iyo alaabta "qiimahoodu hooseeyo": $ 0.10 oo laga bixiyo 100 kg. Maalintii. Marka la xisaabinayo lacagaha bakhaarka, waxyaabahan soo socda waa in loo tixgeliyaa alaab "qiimahoodu hooseeyo": biraha shubka, biraha kale ee xadiidka ah, biraha xadiidka fidsan iyo biraha kale, shamiitada, alwaaxda, bulukeetiga, dhagaxa, carrada, macaadinta birta ah iyo kuwa aan birta ahayn (oo ay ka mid yihiin daamurka, laamiga, nuuradda iyo wixii la mid ah), fuustooyinka iyo konteenarrada faaruqa ah, biraha duugga ah, cusbada, dhuxusha, lafaha, iyo alaabta dhaawacu soo gaarey oo ay tahay in la burburiyo.
2. Qiimahan waa in hoos loo dhigaa 50% (konton boqolkiiba) marka alaabadu ay taallo daaradda furdada oo aaney ku jirin bakhaarrada furdada. Ka dib 45 maalmood ee ugu horreeya (oo ay ku jiraan tobanka maalmood oo lacag la'aanta ah) Qiimaha waa in la laba-laabaa.
3. Qiimahan kore waxaa loo adeegsanayaa alaabooyinka cid laga hayo, oo ay ka mid yihiin Alaabooyinka la qabtey ama gacanta lagu soo dhigey. Maamulka bakhaarrada furdada iyo qiimeynta iyo qaadista lacagta waajibtey iyo wareejinteeda loo wareejinayo Dowladda waa in uu sameeyaa Furdada.

## Qodobka 52aad
## Ujuurada Marsada (Wharfage)

1. Ujuurada marsada waxaa laga qaadayaa alaabta laga raro ama laga dejiyo dekadaha Jamhuuriyadda, iyada oo qiimaheedu tahay 1.5 boqolkiiba qiimaha alaabta ee la canshuurayo, oo loo go'aaminayo si waafaqsan Sharciga Furdada. Lacagtan waa ujuuro lagu qaadanayo adeeg la bixiyey.
2. Ujuurada marsada waxaa qiimeynaya oo qaadayana Furdada
3. Ujuurada marsada waxaa laga dhaafey:
   a. Alaabta canshuur-dhaafka loogu sameeyey faqradaha 1, 5, 9, 12, 15, 16 iyo 26 ee Qodobka 48aad iyo faqradaha 2aad iyo 5aad ee Qodobka 49aad ee Tariifada Furdada;

b. Soo-dejinta iyo dhoofinta canshuur-dhaafka loogu sameeyey Shuruuc gaar ah. Ganacsiga ka dhaca min dekad ilaa dekad (*coastal trade*) iyo alaabta la sii gudbinayo waxaa ujuurada marsada looga qaadayaa keliya halka laga rarayo.

**Qodobka 53aad**
**Canshuurta Warshadeynta Sonkorta**

1. Sonkorta lagu warshadeeyo Soomaaliya waa in laga qaadaa canshuurta warshadeynta.
2. Wasiirka ayaa xeer nidaamiye ku soo saaraya qiimaha canshuurta warshadeynta sonkorta, hadba heer xukuumadeedka u xilsaaran si waafaqsan Qod.50aad (b) ee Dastuurka KMG ah.
3. Maamulka furdada waa in uu mas'uul ka ahaadaa qiimeynta iyo qaadista canshuurta Warshadeynta sonkorta si waafaqsan sharciga furdada iyo xeer nidaamiyaha.
4. Wasiirka Maaliyadda ayaa leh awood uu ku soo saaro xeer-nidaamiye ku saabsan arrinta. Canshuurta warshadeynta kuma waajibeyso sonkorta la dhoofiyo waana in "loo soo celiyaa" marka farsameeynta alaab sonkor lagu daro canshuurteeda la bixiyey ee la dhoofiyay.

**Qodobka 54aad**
**Canshuurta Dheeraadka Ah Ee Laga Qaado Sonkor Soo Gasha Dalka**

1. Sonkorta loo soo dhoofiyo Soomaaliya waa in la saaraa canshuurta dheeraadka ah ee soo gelitaanka dalka oo la mid ah canshuurta warshadeynta.
2. Canshuurta dheeraadka ah ee alaabta lasoo dejiyo ee ay ku jirto sonkor waa in la saaro si waafaqsan boqolleydan soo socota ee xisaabinteedu ay sal u tahay miisaanka saafiga ah ee badeecada:
   a. Nacnaca, macmacaanka, xanjada iyo wixii la mid ah 80%
   b. Sharaabka la cabbo, malmalaaddada, iyo wixii la mid ah 50%
   c. Shukulaatada, miraha nacnac laga dhigey, xalwadda iyo wixii la mid ah 40%
   d. Cabitaannada kale ee macaan 20%
   e. Khudaarta shiidan iyo cabitaannada khudaarta ah ee la macaaneeyey 20%
   f. Rootiga macaan ee "*Panettoni*", keegagga iyo doolshada kale, buskutka iyo badeecadaha kale ee la macaaneeyey 20%
   g. Badeecadaha kale ee ay ku jirto sonkor lagu darey 20%
3. Canshuurta dheeraadka ah ee soo dejinta "sonkoraha kale" (*glucose, maltose, iwm.*) oo loo eegayo saamiga awoodda macaaneynta waxtarka leh ee ay leeyihiin badeecadahan, canshuurta dheeraadka ah ee soo dejinta alaabta dalka soo geleysa waa in aan lagu soo rogin badeecadaha caafimaadka iyo daawooyinka.

Haddii ay lagama maarmaan noqoto madaxyada iyo boqolleyda kor lagu xusey waxa wax looga beddeli karaa wareegto uu soo saaro Wasiirku.

**Qodobka 55aad**
**Canshuurta Warshadeynta ee Aalkolada**

1. Qiimaha canshuurta aalkolada aan la baraxin ee lagu warshadeeyo Soomaaliya waxa xeer nidaamiye ku soo saari doona Wasiirka.
2. Maamulka furdada ayaa mas'uul ka ah qiimeynta iyo qaadista canshuurta warshadeynta aalkolada si waafaqsan shuruucda furdada. Wasiirku waxa uu leeyahay awood uu arrimahan ugu soo saaro xeer-nidaamiyeyaal marka loo baahdo.
3. Canshuurta warshadeynta waa in aan laga qaadin:
   i. Aalkolo loogu talo galey ujeeddooyin caafimaad iyo daawo;
   ii. Aalkolada la dhoofiyey.
4. Canshuurta warshadeynta waa in "la soo celiyaa" marka alaabta ay ku jirto aalkolo oo canshuurteeda horey loo bixiyey la dhoofiyo.
5. Waxaa Dalka ka mamnuuc ah in lagu warshadeyo Aalkalo la khamiiriyey, la macaaneeyey ama la carfiyey iyo cabitaan Aalkolada kujirto oo maanka dooriyo.

**Qodobka 56aad**
**Canshuurta Dheeraadka ah ee Xuduudda Looga Qaado Aalkolada**

1. Aalkolo saafi ah, aalkolo la macaaneeyey ama la carfiyey iyo cabitaannada aalkoladu ku jirto waa in Xuduudda looga qaadaa canshuurta Dheeraadka ah ee Xuduudda oo la mid ah canshuurta warshadeynta ee aalkolada si waafaqsan xeer nidaamiyaha wasiirka.
2. Canshuurta Dheeraadka ah ee Xuduudda looga qaado aalkolada waa in aan la saarin:
   a. Badeecooyinka caafimaadka iyo daawooyinka;
   b. Cabitaannada canabka dabiiciga ah;

**Qodobka 57aad**
**Baabi'in**

1. Qodob kasta oo ka mid ah shuruucdii hore oo aan la jaanqaadi karin qodobadda sharciggan waa la baabi'iyay.
2. Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka waxay sii isticmaalayaan shuruucda canshuuraha furdooyinka ee hadda dhaqangalka u ah inta laga midaynaayo shuruucda maaliyadda ee labada heer.